MAJALADDA
MARAG

cadadka Koowaad | April 2025

# DHIBAATADA SHAQO LA'AANTA EE DHALLINYARADA PUNTLAND:

## MA MAAMUL-XUMO MISE MOOGAAN SIYAASADEED?

Siciid Abshir Yuusuf

Bogga: 30



**Xigashada Sawirka:** Puntland State House

MAJALADDA MARAG

# Qorayaasha Wargayska


**Dr. Maxamed Cali Faarax**
**Gogosha Madaxweyne Xasan Shiikh:** Ma keeni doontaa xal u helidda caqabadaha siyaasadeed ee Soomaaliya? 4


**Cabdullaahi Rubaani**
**Argagixisada Soomaaliya:** Qorshe Qaran oo miidaysan ayaa lagaga guuleysan karaa 7


**Maxamuud Ciyoon**
Dhibaatooyinka waxbarasho ee kajira Puntland (Qaybta 1-aad) 10


**Maxamed Siciid Faarax**
**Doorashada dadban:** halista kala qaybsanaanta iyo wadajirka bulshada 13


**Maxamed Mire**
Afrika maxay ku waayaysaa wayraxsanaanta Trump? 16


**Mustafe Farah Osman**
**Soo laba kacleynta Al-Shabaab**: Maxay ku keeni kartaa mustaqbalka Soomaaliya? 19


**Sakariye Ahmed [Rabiica]**
Islaamka iyo Nolosha 22


**Axmed Siciid Muuse**
**Rajada dowlad-dhiska Soomaaliya oo hubanti la'aan ah:** Maxaa samatabixin kara? 25


**Cabdirashiid Maxamed Cabdi**
**Sheeko Qaran:** Sooyaalka halgamadii gobannimo doonka Soomaaliyeed (Qaybta 1-aad) 28


**Siciid Abshir Yuusuf**
**Dhibaatada shaqo la'aanta ee dhallinyarada Puntland:** Ma Maamul-xumo mise moogaan siyaasadeed? 30

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda koowaad ee Majalladda Marag, oo ah madal aan ugu talagalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee nolosha.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Horufadhi Media, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya gaar ahaan dhalinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud



Xigashada Sawirka: Villa Somalia

# GOGOSHA MADAXWEYNE XASAN SHIIKH:

## Ma keeni doontaa xal u helidda caqabadaha siyaasadeed ee Soomaaliya ?

Dr. Maxamed Cali Faarax

Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya Xasan Shiikh Maxamuud, oo muddo xileedkiisii 4-ta sanno ay qiyaastii hal sanno ka harsantahay, ayaa habeenkii ay bilatay Ciidul Fitriga oo ku beegnayd 29/03/2025 jeediyey khudbad isugu jirtay hambalyada ciidda iyo fidinta gogol qaran si looga tashato xaaladda cakiran ee uu dalku marayo.

Dhawaan, saaxiibbada beesha caalamka ee Soomaaliya, gaar ahaan safiirrada Maraykanka iyo Ingiriiska ayaa Madaxweynaha u soo jeediyay inuu tallaabo degdeg ah qaado, uuna isugu yeero saamilayda siyaasadeed si hab wadajir ah looga tashto xaaladaha loona gaaro isfaham.

Sidoo kale, Xasan Shiikh oo dabayaaqadii Maarso safar ku tegey Turkiga, oo kamid ah saaxiibada ugu weyn ee Soomaaliya, ayaa la sheegay in ay u soo jeediyeen in uu qabto shir- weyne qaran oo looga wadaxaajoonayo xaaladda dalka. Turkiga oo tan iyo 2017-dii Soomaaliya ka taageerayay dhismaha ciidamada, wuxuu bishii Diseembar ee sanadkii tagay 2024-ka dhexdhexaadiyay damacii Itoobiya ee badda Soomaaliya oo khilaaf weyn oo diblomaasiyadeed ka dhex qarxiyay labada dal ee kuyaala Geeska Afrika.

## NUXURKA KHUDBADDA MADAXWEYNAHA

Isaga oo tixgelinaya soo jeedimaha saaxiibada beesha caalamka, ayuu Madaxweyne Xasan Shiikh hambalyada ciidda ku daray hadal kooban oo uu gogol ugu fidiyay siyaasiyiinta iyo waxgaradka Soomaaliyeed si looga wadahadlo:

1. In loo midoobo la dagaallanka argagixisada
2. Sidii loo heli lahaa dowlad casri ah oo dimoqraaddi ah

Labada qodob ee uu Madaxweynuhu tilmaamay waxaa laga dheehan karaa dhowr arrimood;

1. In Madaxweynuhu xoogga saarayo in Soomaalidu u midowdo la dagaallanka argagixisada oo khatar wayn oo aan la dhayalsan karin ku ah amniga qaranka, suurtagalna aysan ahayn in la gaaro dowladnimo taabbagasha haddii aan dalka laga sifayn.
2. Waxaa kale oo hadalka Madaxweynaha laga dheehan karaa in shirku uu noqdo mid siyaasiyiinta Soomaaliyeed ay u dhan yihiin, halka uu dhinaca kalena ka tilmaamay waxgaradku inay qayb ka noqdaan sida bulshada rayidka ah, aqoonyahanka iyo dhaqankuba.
3. Waxaa hadalka laga dheehan karaa oo kale in Madaxweynuhu uu weli ku taagan yahay qorshihiisii ahaa inuu dalka ka hirgeliyo doorasho qof iyo cod ah, iyadoo aysan suurto gal ahay in dowlad casri oo dimuqraadi ah la gaaro haddii aan xal laga gaarin caqabadaha waa-weyn sida dhammaystirka dastuurka kumeelgaarka ah ee dalka, ka sifaynta argagixisada deegaanada ay haystaan, iyo xoojinta xiriirka dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada si loo dhiso hannaan siyaasadeed oo mideysan.

## FALCELINTA SIYAASIYIINTA

Siyaalo kala duwan ayaa looga falceliyay hadalka Madaxweynaha, dhinacyo kala duwanna waa laga kala istaagay:

Siyaasiyiinta kala ah ah Shiikh Shariif, Xasan Cali Khayre iyo Cabdiraxmaan Cabdishakuur, ayaa soo saaray qoraal ay ka muuqato inay wali taxadar ka muujinayaan in hadalka Madaxweynaha ay ka maqan yihiin qodobbo mudan in laga war sugo sida qaabka shirka, cidda ka qayb galaysa iyo ajandaha rasmiga ah.

Madaxweyne Farmaajo ayaa dhankiisa soo dhaweeyey baaqa Madaxweynaha, hase ahaatee wuxuu ka istaagay dhanka midnimada dalka, isagoo sheegay inaan talo hal dhinac ah keligeed socon karin, haddii la isku dayana ay khatar ku tahay midnimada dalka.

Dhanka kale, qoraalka Farmaajo waxaa ka muuqda inuu diidan yahay in shirkaan lagu martiqaado siyaasiyiin aan xilhayn, isagoo soo jeedinaya in wadahadalku ku koobnaado Dawladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha Ka ah Federaalka. Farmaajo oo xilligiisii

wadahadallada siyaasaddu ay ku koobnaayeen Dawladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha Ka ah Federaalka, dhammaan siyaasiyiinta mucaaradka ahna ay dibad joog ka ayaayeen, ayaa waxaa muuqda inuu Xasan Shiikh Maxamuud la doonayo dabinkii uu ku dhacay mid la mid ah.

Waxaa sidoo kale hadalka Madaxweynaha ka falceliyey Ra'iisul Wasaarayaal hore sida Cumar Cabdirashiid Cali Sharma'arke iyo Cabdi Faarax Shirdoon oo muujiyey inay soo dhawaynayaan gogosha uu Madaxweynuhu ku baaqay, balse waxay boggaadintooda raaciyeen in shirku leeyahay ajande iyo qorshe lagu wada qanacsan yahay. Shirdoon ayaa intaas raaciyay inay gogosha ka muhiimsan tahay sida ay Villa Soomaaliya uga go'an tahay in xal laga gaaro tabashooyinka arrimaha dastuurka iyo doorashooyinka oo ay madaxtooyadu hore keligeed isugu cabirtay.

Ra'iisul Wasaare Maxamed Xuseen Rooble ayaa isagu dhankiisa soo dhaweeyey gogosha Madaxweyne Xasan uu fidiyay shuruud la'aan. Taliyihii hore ee Nabadsugidda Qaranka Fahad Yaasiin ayaa isna soo dhaweeyey baaqa Madaxweynaha, wuxuuna ku tilmaamay mid "macquul ah oo dhiirrigelin mudan", wuxuuna intaas ku daray in Madaxweynaha siduu wax u rabo loogala shaqeeyo.

Madaxda Dowladaha Xubnaha Ka ah Federaalka ayaan ka hadlin gogosha Madaxweyne Xasan fidiyay marka laga reebo Axmed Madoobe oo muujiyay dareen ah in Soomaalidu xilligan u baahan tahayn isu-tanaasul, haddana kama muuqan khudbaddiisa wax soo dhawayn ah oo toos u taabanaysa soojeedintii Madaxweynaha. Sidoo kale Wasiirka Warfaafinta Puntland Maxamuud Caydiid Dirir oo waraysi siiyay warbaahinta maxaliga ah ayaa muujiyay in maamulka Puntland uusan xilligan diyaar u ahayn ka qeybgalka gogoshaas, isagoona ku andacooday in Puntland ay ku jirto dagaal, madaxweynaheeda Siciid Cabdullaahi Denina uusan waqti u hayn.

## FILASHADA GOGOSHA

Aamusnaanta qeyb kamid ah Dowladaha Xubnaha Ka ah Federaalka iyo jawaabaha Puntland iyo Jubbaland ayaa muujinaysa shaki weyn oo laga qabi karo qabsoomista gogosha uu Madaxweynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya ku baaqay. Dowladaha Xubnaha Ka ah Federaalka ayaa ah saamilayda siyaasadda asaasiga oo ay muhiim tahay in ay qeyb ka qaataan hanaanka siyaasadeed ee dalka, gaar ahaan marka ay timaado arrimaha sida: dastuurka, hanaanka doorashooyinka qaranka, iyo la dagaalanka argagixisda, qodobadaas oo udub dhexaad u ah ajandaha muhiimka ay tahay in diiradda xilligan lagu saaro.

Haddii gogoshan Madaxweynaha ay dhab ka tahay oo ay ka qeybgalaan dhammaan saamilayda asaasiga ah ee siyaasadda; waxa ay noqon kartaa mid xal looga gaari karo caqabadaha taagan ama bilow u noqota wadahadallada xilliga kala guurka ah si loo samatabixiyo dalka, haddiise ay noqoto mid uu Xasan Shiikh isaga yaraynayo cadaadisyada haysta, oo aysan ka qeybgalin dhammaan Dowladaha Xubnaha Ka ah Federaalka, waxay noqon doontaa mid aan keenin xal waara, oo keeni karta in xaaladda siyaasadeed ee dalka ay ka sii darto, iyadoo la waayi karo fursado muhiim ah oo hadda jira oo xal looga gaari lahaa khilaafaadka iyo caqabadaha amni ee dalka horyaala.

**Dr. Maxamed Cali Faarax**



**Xigashada Sawirka:** Villa Somalia



Xigashada Sawirka: Reuters

# ARGAGIXISADA SOOMAALIYA

## Qorshe Qaran oo miidaysan ayaa lagaga guuleysan karaa

Cabdullaahi Rubaani

Soomaaliya ayaa tan iyo 1991-kii waxay la dhibbaatoonaysa xaalado amni daro kadib markii dowladnimadii ay meesha ka baxday dalkuna galay burbur iyo xasilooni daro, taasoo keentay asaasmida kooxo urur diimeedyo hubaysan oo wata ajandayaal caalami ah. Kooxahan oo ay ugu weynyihiin Al-Shabaab iyo Daacish ayaa khatar weyn ku keenay dib u dhiska dowladnimada, xasiloonida guud ee dalka iyo gobalkaba.

Kooxahan oo ka faa'idaysanaya tabardarida ha'ayadaha amniga ee dalka iyo khilaafyada siyaasadeed ee jira ayaa saldhigyo ka samaystay qaybo kamid ah dalka, halkaas oo ay ka soo abaabulaan weeraro qorshaysan oo ay ku carqaladaynayaan nabadgelyada iyo dowlad dhiska Soomaaliya.

Al-Shabaab oo xiriir la leh urur weynaha Al-Qaacida, ayaa gacanta ku haysa deegaano badan oo kuyaala koonfurta Soomaaliya inkastoo sanadihii u dambeeyay laga xoreeyay dhul badan hadanna kooxdan ayaa weli khatar weyn ku ah xasiloonida dalka. Kumanaan dad rayid ah, ciidamo, masuuliyiin dowladeed iyo ciidamada nabad ilaalinta midowga Afrika ayaa naftooda ku waayay muddadii ay halgankooda wadeen.

Dhanka kale, kooxda Daacish, oo fadhigoodu yahay deegaanada Buuralayda Caal-miskaat ee gobolka Bari, Puntland, Soomaaliya, ayaa tiro ahaan korortay sanadihii u dambeeyay kadib markii ajaaniib badan ay ku biireen, sida ay sheegeen saraakil sare oo ka tirsan waaxda difaaca Mareykanka. Kooxdan ayaa deegaanadaas muhiim weyn u aragta halkaas oo ay dhanka saadka iyo maalgelinta shabakadaha Daacish ee Afrika iyo caalamkaba ka xoojin karto.

# XAALADA AMNI IYO HALISTA ARGAGIXISADA

Kooxahan ayaa sanadihii u dambeeyay fuliyay weeraro argagixiso oo galaaftay nolosha dad badan. 2024-kii, tusaale ahaan, Al-Shabaab ayaa 798 weerar ka geysatay gobolada Shabeellaha Hoose, Bay iyo Jubbada Hoose, sida ay diiwaangelisay Armed Conflict Location & Event Data (ACLED). Isla sanadkaas, 44% ayaa hoos u dhac ku yimid weerarada Al-Shabaab ee gobolka Banaadir kadib markii ciidamo xasilin ah oo katirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed (CXDS) la geeyay irdaha ugu waaweyn ee laga galo Muqdisho.

Tirada rasmiga ah ee dagaalyahannada Al-Shabaab weli lama oga, balse qiyaasaha hore waxay muujinayaan koror weyn. Sannadkii 2008-dii, Midowga Afrika wuxuu ku qiyaasay 2,000 dagaalyahan, halka 2011-kii ay gaareen 9,500. Sannadkii 2022-ka, laamaha amniga waxay qiyaaseen in tiradoodu tahay 4,000–7,000. Si kastaba oo ay ahaataba, warbixin ay Kooxda Kormeerka Qaramada Midoobay soo saartay Janaayo 2024-kii ayaa qiyaastay in tiradoodu gaarsiisan tahay 7,000–12,000, taasoo muujinaysa awooddooda iyo sii wadida halgankooda.

Dhanka dhaqaalaha, maleeshiyada Al-Shabaab ayaa leh ilo dhaqaale oo xoogan. Inkastoo aan la ogayn lacagta saxda ah ee Al-Shabaab heshay sanadka 2024-kii, warbixinno ayaa muujinaya in kooxda ay weli ku tiirsan tahay lacagaha baada ah, canshuuraha, iyo ka ganacsiga badeecooyinka si ay u maalgeliso hawlgalladooda. Dowladda Federaalka Soomaaliya inkastoo ay isku dayday in ay joojiso ilaha dhaqaale ee kooxda, waxay weli haysataa ilo kala duwan oo dhaqaale.

Dhawaan, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay bilowday dagaal ka dhan ah maleeshiyadda Al-Shabaab kadib markii uu hagad ku yimid in muddo ah, taasoo fursad u siisay maleeshiyadda in ay dib u qabsato deegaano badan oo horey looga xoreeyay oo ay kamidtahay Ceel-baraf oo kutaala Shabeellah Dhexe.

Dhanka Puntland, dabayaaqadii sanadkii 2024-ka ayaa waxay Puntland diyaarisay guluf ka dhan ah kooxda Daacish kuwaasoo sanadihii u dambeeyay si weyn isugu ballaariyay deegaanada buuralayda Caal-miskaat ee gobolka Bari. Dagaalka Puntland ku qaaday Daacish oo ilaa hadda halkaas ka socda ayaa banaanka soo dhigay inta ay la egtahay halista kooxdan oo aan awal lagu baraarugsanayn.

Waxyaabaha keenay in Daacish ay si aan la filayn u kororto ayaa waxaa kaalin weyn ka qaatay lacagaha baada ah oo ay ka qaado ganacsatada Boosaaso, oo ah xarunta ganacsiga Puntland, waxay sidoo kale lacag ka heeshaa dhoofinta qadar yar oo dahab ah oo laga qodo gobolka Bari, sida ay sheegtay warbixin dhawaan ay daabacday ha'ayadda International Crisis Group (ICJ). Dowladda Mareykanka waxay sheegtay in Daacish ay tan iyo 2022-kii urursatay $6 milyan. Ganacsatada ku sugan Boosaaso oo wareysi siiyay Crisis Group ayaa sheegay in Daacish ay ka khatar badan tahay Al-Shabaab marka ay lacagaha baadda qaadayaan, iyagoo dalbanaya lacag badan oo dheeraad ah oo haddii ay waayaan ku hanjabaya in ay dhibbaato gaarsiinayaan ganacsiga.

Halista kooxahaan oo muddo sannooyin ah wada halgan ay ku doonayaan in ay kula wareegaan dalka ayaa haddii aan si dhab ah loo wajihin ciribtirkooda waxay wiiqi karaan dadaalada dowlad dhiska ee Soomaaliya. Hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ee Soomaaliya heer federal iyo heer maamul goboleed oo isku haya awood-qeybsiga ayaan weli hirgelin hannaan amni qaran oo mideysan, kaasoo qeexaya qaab-dhismeedka ciidamada iyo xiriirka u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka markii ay timaado la dagaalanka kooxaha argagixisada ah.

# QORSHAHA LAGU XAAQIIJIN KARO CIRIBTIRKA ARGAGIXISADA

Inkastoo niyadjab deeqbixiyeyaasha ah ay jirto, Soomaaliya ayaa weli haysata fursada saaxiibo caalami ah oo taageero ka siiya dhanka ciidamada sida Maraykanka, Turkiga iyo dalal kale. Tusaale, Maraykanku, intii u dhaxaysay 2010-kii iyo 2020-kii, wuxuu bixiyay in ka badan $500 milyan oo taageero toos ah oo dhanka amniga ah oo la siiyay ciidamada Soomaaliya, sida lagu sheegay warbixin ay soo saartay Congressional Research Service.

Sidoo kale waxaa jira dalal badan oo uu Turkigu hormuud ka yahay oo tan iyo sanadkii 2017-kii tababar siinayay ciidanka Soomaaliya kadib markii uu saldhiga ugu weyn ee ciidan oo adduunka ku leeyahay ka samaystay Muqdisho.

Haddaba iyadoo ay Soomaaliya fursadahaas haysato waxaa la jooga wakhtigii ay ka faa'idaysan lahayd lana saamayn lahaa qorshe dhammaystiran oo lagu ciribtirayo kooxahaan argagixisada ah.

Si loogu guulaysto qorshahaas waxaa mudan in la hirgeliyo qodobadaan muhiim ka ah:

1. In la mideeyo howlgalada ka dhan ah kooxaha argagixisada sida Al-Shabaab iyo Daacish iyadoo la dejinayo qorshe qaran, midaysan, oo dhammaystiran.
2. In hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ee heer federal iyo heer dowlad goboleed ay dhinac iska dhigaan kala aragti duwanaanshaha siyaasadeed, laguna midoobo ciribtirka kooxaha argagixisada ah.
3. In ciidamada la dagaallamaya kooxaha argagixisada loo helo hub casri ah, tababar sare, taageero sirdoon, daryeel caafimaad, mushahar joogto ah, sahay ciidan, iyo isku-xirnaan si ay waajibaadkooda amni u gutaan si hufan.
4. In madaxda Dowladda Federaalka iyo Dowladdaha Xubnaha ka Federaalka ay isugu yimaadaan shir qaran oo deg-deg ah si ay u diyaariyaan istiraatiijiyad qaran oo lagula dagaallamayo argagixisada, taasoo si cad loogu qeexayo doorka dowlad-goboleedyada iyo dowladda federaalka.

**W/Q: Cabdullaahi Rubaani**



Xigashada Sawirka: Dugsiga Sare ee Cumar Samater

# DHIBAATOOYINKA WAXBARASHO EE KAJIRA PUNTLAND

Qeybta (1aad)

Maxamuud Ciyoon

Kadib burburkii dowladdii Soomaaliya ee 1991-dii, Puntland waxay ka mid noqotay gobolladii ugu horreeyay ee dib u soo nooleeya waxbarashada. Inkasta oo horumar laga sameeyay, haddana waxay weli wajahaysaa caqabado badan.

Haddaba, qormadan waxaan ku eegayaa dhowr caqabadood oo si gaar ah u khuseeya ardayga ku jira fasalka ugu danbeeya ee marxaladda shahaadiga ah ee dugsiga sare. Caqabadahaas oo isugu jira mid ay keentay siyaasadaha kala duwan ee waxbarashada guud ahaan Soomaaliya, mid dhaqaale iyo mid qaabka waxbarista ah.

## CULAYSYADA DHAQAALE

Burburkii dowladda dhexe kadib, ma jirto waxbarasho lacag la'aan ah guud ahaan geyiga Soomaaliyeed, taasoo keentay in culayskaas uu ku dhaco waalidiinta oo dhammaan bixiya dhaqaalaha waxbarashada ee heerarka kala duwan.

Lacagta billaha ah oo ah **$20** waxaa dheer kharashaad laga qaado imtixaanka billaha ah ee iskuulka **$5**, iibka buugaagta waxbarashada **$33**, sawirka iyo imtixaanka shahaadiga **$35**, shahaadada dugsiga sare ee dowladda Puntland **$35**, shahaadada federaalka haddii uu u baahdo **$30**, iyo tasdiiqinta Wasaaradda Arimaha Dibadda Federaalka **$20**, oo marka dhammaan kharashaadkaas la isku daro noqonaysa **$393**.

Lacagtaas waa kharashka ku baxaya hal arday sanadka ugu danbeeya ee shahaadiga ah. Marka shahaadada Federaalka laga reebona waxay isku noqonaysa $340. Haddaba sidee buu noqonayaa qoyska labo arday ay u dhiganayso ama ka badan! Waa culays aad u weyn oo dul saaran qoysaska Soomaaliyeeed oo xilligan kunool dal uu dhaqaalihiisu burbursan yahay, sicir barar jiro, Shilin Soomaaligii oo meesha ka baxay, shaqo la'aan baahsan. Waalidku waa in uu bixiyaa dhaqaalahaas oo ay u dheertahay noloshii kale, si uu ilmahiisa uga baaqsado tahriib, ka faa'iideysi amni xumo, waxaa se isweydiin mudan, xaggee ka keenayaa?.

Sidaas oo ay tahay, waxa dhacda mararka qaarkood in ardayda ay u baahato shahaadada federaalku aysan si fudud ku helin oo ay wakhti ku qaadato ama laga xanniboba. Kuwaas oo u badan ardayda geleysa Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ama kuwa raba in ay dibadda waxbarasho u doontaan.

Kala duwanaanta siyaasadaha waxbarasho

Maadaama isu socodka bulshada Soomaaliyeed uu caadi yahay, lagana yaabo in qoys u guuraan degaan kale oo Soomaaliyeed, waxaa ardayda saamayn ku yeelata kala duwanaanta manhajka iyo siyaasadda waxbarasho.

Waxan tusaale u soo qaadanayaa sida ay siyaasadaha is khilaafsani saamaynta taban ugu leeyihiin hannaanka waxbarasho.

Federaalka oo shahaadada dugsiyada sare bixisa, waxay derejooyinka Imtixaanka shahaadiga ah u qaybisay sidan:-

Sida ka muuqata derejada "D" ardayga keena waa uu dhacay, waana inta u dhaxaysa 40-49. Dhanka Puntland, waxay u qaybisay derejada natiijada imtixaanka shahaadiga ah sidan:-

The certificate's grading and scoring scheme / نظام الدرجات والتسجيل للشهادة

| Grade | A+ | A | A- | B+ | B | B- | C+ | C | C- | D | E | F |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Points | 95-100 | 90-94 | 85-89 | 80-84 | 75-79 | 70-74 | 65-69 | 60-64 | 50-59 | 40-49 | 20-39 | 0-19 |

*Table 4: Grading System*

| Grading Scales | Starting Marks | Ended Marks |
|---|---|---|
| A | 90 | 100 |
| A- | 80 | 89.99 |
| B+ | 76 | 79.99 |
| B | 73 | 75.99 |
| B- | 70 | 72.99 |
| C+ | 66 | 69.99 |
| C | 63 | 65.99 |
| C- | 60 | 62.99 |
| D+ | 56 | 59.99 |
| D | 53 | 55.99 |
| D- | 50 | 52.99 |
| E | 0 | 49.99 |

27 of 79

**Result Recording**

U fiirso derejada "D" ardayga keena waa uu gudbey, wuxuna keenay inta u dhaxaysa 56-52.99.

Ardaygaasi marka uu damco inuu shahaado federaal helo, ma helayo sababtuna waxay ka dhigan tahay arday dhacay oo shahaado gudbid ah raadinaya.

Waxa jira gobollo Puntland ah oo Somaliland saamayn ku leedahay dhanka waxbarashada tusaale ahaan gobollada Sanaag iyo Haylaan, oo arday badani labo imtixaan oo shahaadi ah galaan, dhaqaalena kaga sii kordhayo. Sidaas darteedna ay saamayn toos ah ku leeyihiin federaalka, Puntland iyo Somaliland.

Waxa jira kala duwanaansho maaddooyinka Juqraafiga iyo Taariikhda oo laga yaabo in maamul walba si gaar ah u akhriyo taariikhda Soomaalida ama uu si gaar ah u yaqaan qeexidda kelmedda "DALKA". Waxbarashadana waxa ugu weyn ee yoolkeedu yahay xaqiijinta arimaha ay ka mid yihiin xoojinta aqoonsiga wadaniyadeed, xoojinta taariikhda iyo dareenka wadan jacayl iyo ilaalinta midnimadiisa.

## DHIBBAATOOYINKA QAABKA WAXBARISTA

Waxbarashadu waa shaqo baaxad weyn oo u baahan maamul iyo hagid fiican, bare tababaran oo si habboon u fulin kara yoolalka waxbarashada, manhaj daabacan oo lagu saleeyey baahida la qabo iyo wakhtiga, kaas oo wata hageyaashii macallinka.

Dhibaatooyinka waxbarasho oo Puntland ka jira waxaa kamid ah tababar la'aan bareyaasha haysata, manhajka oo ka badan xilli dugsiyeedka, manhajka oo aanu la socon hagaha macallinku, iyo agab yarida dugsiyada. Sidoo kale waxaan la qarin karin in xarumaha waxbarashada aysan siin macalimiinta mushahaar ku filan taasoo keenaysa in macalimiinta leh xirfado waxbarid, aqoon xagga maaddada, iyo waayo-aragnimo la xiriirta baridda, ay ka door bidaan macalinimada shaqooyin kale oo dhaqaale ahaan ka wanaagsan.

Sanadihii u dambeeyay, qoysas badan gaar ahaan dadka dakhligoodu dheex-dhexaadka yahay iyo kuwa sareba, ayaa ka guuray Puntland una wareegay dalal ay kamidyihiin Kiinya, Ugaandha iyo Masar si ay carruurtooda ugu helaan waxbarasho tayo leh. Arrintani waxay salka ku haysaa baahida loo qabo iskuullo tayo sare leh oo soo saari kara jiil leh aqoon la jaanqaadi karta nidaamyada waxbarasho ee dalalka deriska la ah Soomaaliya, maadaama aysan Puntland ka jirin iskuullo buuxiya shuruudahaas.

Warqad-cilmiyeed uu qoray Dr. Maxamuud Hoori oo uu daabacay machadka cilmi-baarista SIDRA ee fadhigiisu yahay Garoowe sanadkii 2024-ka ayaa soo jeedinaysa in gabi ahaanba wax laga bedelo falsafada ay ku dhisan tahay waxbarashada Soomaaliya iyo qaabka wax loo dhigo, wax loo barto, ama lagu qiimeeyo aqoonta iyo barashada ardayda.

Dr. Maxamuud Hoori wuxuu ku sheegay warqad-cilmiyeedkiisa in horumarka baaxadda leh ee tiknoolajiyada iyo aqoonta ee dunida oo dhan maasheeyey ay khasbayso in isbedel qoto-dheer lagu sameeyo hab-ka fikirka, kobcinta garaadka, iyo xirfadaha jiilka soo koraya si loogu diyaariyo in ay yeeshaan aqoonta iyo xirfadaha baahida weyn loo qabo ee la jaanqaadi kara isbedelka tiknoolajiya iyo suuqa shaqada. Isbedelkaasi wuxuu keenayaa in laga guuro manhajkii iyo nidaamkii waxbarasho ee qadiimka ahaa, loona guuro nidaam hor leh oo ku dhisan karti-aqooneed iyo kasbasho xirfadaha daruuriga u ah nolosha iyo suuqa shaqada.

**W/Q: Maxamuud Ciyoon**



**Xigashada Sawirka:** Dugsiga Sare ee Cumar Samater



**Xigashada Sawirka:** Baraha Bulshada

# DOORASHADA DADBAN

## halista kala qaybsanaanta iyo wadajirka bulshada

Maxamed Siciid Faarax

Laga soo bilaabo 2000 ilaa 2022-kii, Soomaaliya waxa la qabanayey doorashooyin dadban, waxaana dowladadaha lagu soo dhisayay hannaan dadban, taasoo marka ay soo dhawaato xilli-doorasheedka qaran ama kuwa dowlad goboleedyada uu yimaado walwel ku aadan natiijooyinka taban ee ka dhasha doorashada dadban oo saameyn weyn ku yeelata guud ahaan dalka iyo dadka.

In kasta oo aan la soo koobi karin saameynta iyo dhibka ay ku hayso doorashada dadbani bulshada Soomaaliyeed, haddana waxa jira kuwa si toos ah u taabtay hab- dhaqankii soo jireenka ahaa ee bulshada Soomaaliyeed isu maamuli jireen iyo wada noolaashahoodii.

Faaladan waxaan diiradda ku saari doonaa qayb ka mid ah raadadka iyo saameynta taban ee ay doorashada dadbani uga tagto qaab dhismeedka qabaa'ilka, wada noolanshaha iyo wadajirka bulshada guud ahaan.

## DOORASHADA DADBAN

Doorashada dadbani waa in xilalka masuuliyiinta bulshada metelaysa lagu soo doorto qaab aan toos ahayn, oo u eg xulasho, ayna awooddeeda leeyihiin dad gaar ah sida oday-dhaqameed ama siyaasi gaar ahaan madaxda maamul goboleedyada sidii dhacday 2022-kii, taasoo inta badan ku astaamaysan u sinaan la'aan iyo doonis gaar ah, isla markaana dhalisa muran iyo khilaafyo daba dheraada, doodo badanina ay ka taagan yihiin sharciyaddeeda iyo waxtarkeeda, waxana dad badani u arkaan in ay asaas u tahay caddaalad darrada iyo musuqmaasuqa ku habsaday dalka.

## SOOYAALKA DOORASHADA DADBAN

Shirweynihii Dib-u-heshiisiinta iyo Nabadeynta Soomaaliya ee ay martigelisay dawladda Jabuuti sannadkii 2000, oo ay ka qayb galeen ergooyin ka kala socday beelaha Soomaaliyeed ayaa isku waafaqay in qoondeynta kuraasta baarlamaanka Ku-meel-gaarka ah ee dalka Soomaaliya saldhig looga dhigo hab saami qaybsi beeleed loogu magac daray habka 4.5 (Afar beelood iyo bar). Iyada oo la adeegsanayo habkan ayaa baarlamaankii ugu horreeyey ee Ku-meel gaarka ah, oo ka koobnaa 245 Xildhibaan xilka loo dhaariyey 13-kii Agoosto 2000. Waxana lagu soo dhisay xukuumad ay kamid ahayd qorshayaasheeda, in ay sameyso doorasho loo dhan yahay oo inta badan loo yaqaan doorasho HAL QOF IYO HAL COD (HQHC) si meesha looga saaro nidaamka 4.5.

Labadii xukuumadood ee ka danbeeyey Carta ee ku-meel-gaarka ahaa (2004-2008) iyo (2009-2012-kii) kuma ay guulaysan in ay waddanka gaarsiiyaan doorasho toos ah, iyada oo lagu jiro dadaalladii dib u dhiska dowladnimada dalka, ayaa sannadkii 2012-kii la ansixiyey Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah (DFKMG), waxana wadanku ka baxay ku-meel-gaarnimadii, waxa kale oo "mudnaanta qaran noqday in Soomaaliya laga hirgeliyo doorasho guud oo ka madax-bannaan qaabka beelaha", hasa-yeeshe, arrinkaasi ilaa iyo maanta ma hirgelin, waxana saddexdii xilli doorsho ee ka danbeysay 2012-kii lagu galay qaab dad ban oo ay ku heshiiyeen saamileyda siyaasadeed oo ay ugu horeeyaan Madasha Hoggaamiyayaasha Qaranka (MHQ).

Heshiiska doorashada dadban oo marba marka ka danbaysa wax yar laga bedelayey, waxa heshiiskii u horreeyey la siiyey oday dhaqameedkii qabaa'ilka Soomaaliyeed saxiixa xulista, taas oo dhalisay doodo badan iyo cabashooyin joogta ah oo bulsho weynta Soomaaliyeed ka qabto caddaaladda doorashadaas, qaabka qabaa'ilka iyo reeraha loogu qaybiyo iyo nidaamka (4.5)-ka iyo guud haan habka iyo natiijada doorashada dadban.

## SAAMEYNTA DOORSHADA IYO WADAJIRKA BULSHADA

Doorashada dadban waxa ay saameyn weyn ku leedahay qaab nololeedka bulshada guud ahaan, waxaana ka dhashay khataro badan oo raad xun ku reebay guud ahaan nolosha bulshada iyo hab-maamulkii qabaa'ilka, wada-jirkii beelaha, nabad-gelyada iyo degenaanta

bulshada guud ahaan, raadadka xun ee ay ka tagtay waxaa kamid ah burburka hab maamulkii qabaa’iilka, tusaale waxa dhacda in badan oo kamid ah oday dhaqameedka saxiixa leh ay doorteen shakhsiyaad iyaga la jifi ah ama qaraabo dhow la ah, waxa sidoo kale dhacda in marmarka qaar booska la siiyo nin lacag badan sita oo dadkii kale ee la tartami lahaa xulashada (murashaxnimada) laga saaro. Dhacdooyinkaas oo keena in qaybaha kale ee qab’iilka booska wadaaga ay ka soo hor jeestaan isla markaana ay mucaaradeen oday-dhaqameedkii falka ku kacay. Sidoo kale waxaa dhacda in qabaa’ilada waaweyni aanay wax metelaad ah ku yeelan xubnaha golaha baalamaanka maamul-goboleedka iyo kan qaranka, waxaana arrinkaas keenay in oday-dhaqmeedyada saxiixa leh ay reero gaar ah u xiraan xubnihii iyaga oo aan ogolayn inay wareegto noqoto sida gobollada qaar kood ka dhacda.

Arrintaas waxa ay keentay in qaybaha bulshada ee helay booska iyo kuwa aan helin metelaadda ama tirsanaaya in caddaalad darro booska loo dhaafiyey ay soo kala dhexgasho cadaawad, isnac iyo is tuhun taas oo burbur ku keenta midnimadii iyo wadajirkii bulshadaas ama qabaa’ilkaas.

Sidoo kale waxaa dhacda in ay keento nabadgelyo daro sida in reerihii ama jifaydii waayey xilka ay ku kacaan falal danbiyeed iyaga oo ku xumeynaaya oday dhaqameedka ay ka tirsanayaan caddaalad darrada ama siyaasiga xilka loo boobay. Waxaa kale oo dhacda in oday dhaqameedkii reerkii magta ka soo ururin kari waayo ama haddii looga soo ergoodo uu awood ku yeelan kari waayo inuu khaladkooda wax ka qabto, taas oo ay ka sii dhalato garnaqsi la’aan, qaan bax la’aan, aanada qabaa’ilka dhexdooda ah oo badata iyo waxyaalo kale oo liddi ku ah nabadda iyo degenaanta.

**W/Q: Maxamed Siciid Faarax**
Madaxa Xarunta HADAF, Badhan-Sanaag.








**Xigashada Sawiradaan:** Baraha Bulshada

# AFRIKA MAXAY KU WAAYAYSAA WAYRAXSANAANTA TRUMP?

Maxamed Mire




Xigashada Sawirka: Washington Post

Dib-u-doorashadii Donald Trump waxay si xawli ah u kicisay qalalaasaha siyaasadeed ee caalamku wajahayo, waxaa markii ugu horeysay baqdin dareemay dowladaha isbahaysiga NATO ku jirey oo kor-u-qaadaya miisaaniyadooda is-hubeynta %5 sanadkan, Ingiriiskuna qudhiiso wuxuu qorsheynayaa inuu isaguna %3 uu kordhiyo, waxaana intaas dheer inuu Trump ku goodiyey shirkii ugu danbeysay ee NATO, inuu ka jarayo miisaaniyad-sanadeedka ay bixinjireen, taasoo dhaawac mug leh gaarsiin karta jiritaanka NATO, kana dhigi karta urur u nugul daandaansiga waddamada xawliga dhaqaalahoodu ku socdo sida Ruushka iyo Shiinaha.

Haddaba iyadoo xaalku halkaas marayo, qaaradda Afrika sidee bay u saamaynaysaa dhaq-dhaqaaqa shacbawiga ah ee argatida “Trumpism-gu” hoggaamineyso, se saamayn intee le’eg ayey ku yeelanaysaa waaqaca jiyo-siyaasadeed ee Geeska oo indhwaaleba aan cago adag ku taagnayn.

## AFRIKA IYO TRUMP

Markii dalal badan oo Afrika ah ay xorriyadda qaateen bilowgii lixdamaadkii, ayaa John F. Kennedy dhidabada u taagay Hay’adda Maraykanka ee Horumarinta Caalamiga ah (USAID), 1961-dii, waxaanna loo yagleelay inay kabto waddamada soo koraya ee ku cusub dhaqanka dawladnimadda casriga ah, isla marahaantaana u baahan kab-dhaqaale ay ku xalliyaan baahiyahooda caafimaad, hormarineed, iyo bini’aadanimo. 2024-kii, Africa waxay USAID ka heshay $8 bilyan oo gargaar ah iyadoo tan iyo markii ha’yadda la asaasay heshay $2.6 tirilyan, waxayna sanadkan 2025-ka la saadaalinaayey inay gaari karto $9 bilyan. Africa waxay isku dhiibtay 64-sano oo Maraykanku quudinaayey oo waxaaba loo arkey inay tahay lacag waajib ku ah Maraykanka, iyagoo helayay inay si tartiib ah ay u yareeyaan lacagahaas loogu deeqo, waxaanna wax lala yaabo ah in qaaraddu ka sugto dal shisheeye inuu dhaqaale iyo dawo ku bixiyo cudurka AIDS-ka oo sanadkii 2021-ka ku dilay qaaradda Africa 380,000 oo qof, marka la barbardhigo 2010-kii oo uu dilay 1.2 milyan qof, iyadoo uu si xawli ah hoos ugu dhacayey sanadkasta, taasoo ay ugu wacantahay, dhaqaalaha iyo daawooyinka hormarsan ee uu Maraykanku bilaash ku siin jirey qaaradda Afrika.

Markii Trump uu yimid xafiiska, wuxuu go’aan deg-deg ah ku qaatay dabayaqaadii Janaayo 2024-ka inuu joojiyo dhammaan shaqadii ay haysay USAID, isagoo u aaneynaya, inuu yimid xilligii ay Maraykanku isku-tashan lahaa oo uu xallin lahaa dhibbaatooyinkiisa dhaqaale ee haysta, ayna soo idlaatey dhaqaalaha ay bixinjireen nus qarnigii tagay, Afrika waaga’ ayaa ku baryey!, oo maysan-ba filaneyn in sidaan oo kale ay dhici karto.

Dhanka kale marka laga eego, waxaa hubanti ah maadaama aysan Afrika u diyaarsanayn isbadalkaas xawliga ah ee ku dhacay siyaasadda arrimaha dibadda ee Maraykanka inay raadsandoonto dowlad kale oo buuxisa kaalintaas uu Maraykanku baneeyey, taasoo keeni karta in looga adkaado Maraykanka ama reer Galbeedka-ba, loollanka jiyo-siyaasadeed ee qaaradda ka jirey sanadihiii ugu danbeeyey iyadoo Shiinuhu uu dhaqaale xoog leh ku maalgeliyay Afrika, wuxuuna isku ballaarin karaa si uu u buuxiyo kaalintaas uu Maraykanku baneeyey, sidoo kale Ruushka oo dagaalka Yugrayn ku mashquulsan xilligan wuxuu si dhow ula socodaa isbaddaladaas qaaradda ka socda, marka waxay taasii haddii ay dhacdo wiiqaysaa saameynta Maraykanka ee qaaradda mustaqbalka dhow.

## SOOMAALIYA IYO JOOJINTA USAID

Soomaaliya ayaa safka hore kaga jirtay dalalka sida weyn ugu tiirsan kaalmada Maraykanku bixiyo. Sanadkii tagay kaliya ayey heshay lacag gaaraysa; $1.5 bilyan, taasoo $870 milyan oo kamid ah lagu kharashgareeyey arrimo caafimaad, waxayna ka dhigantahay in ay Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) oo awalba %60 miisaaniyadeydu deeq-ku-tiirsaneed ay waayi doonto in badan oo kamid ah misaaniyad-sanadeedkeeda, taasoo si weyn ay u saameynaysa sida uu sheegay Wasiirka

Maaliyadda DFS Biixi Cige ciidanka Danab oo si toos ah ugu tiirsanaa dhaqaalaha Maraykanka laga helo oo gaaraya $180 milyan. Bilihii tagay wuxuu Maraykanku ka walaacsanaa musuq la sheegay in uu ka jiro maamulka saadka ciidamadaas, waxaanna socday qorshe dib-u-eegis lagu sameynayo taageerida ciidan ee Maraynkanku siiyo Soomaaliya.

Culeyska dhaqaale ee soo foodsaaraya Soomaaliya iyadoo muddo dheer dagaal kula jirtay kooxo argagixiso ah wuxuu cabsi lixaadleh ku abuurayaa sida ay Soomaaliya uga badbaadi karto culayskan weyn ee wajahayso, ma waxay keeni kartaa in kooxahaan sida Al-Shabaab ay sii xoogeystaan oo ay buuxiyaan kaalinta ay baneynaayaan ciiddanka Soomaaliya, iyadoo sidoo kale keeni karta in qabaa'ilku is-hubeeyaan oo awood kale oo tan dowladda u dhiganta ay meesha kasoo baxdo. Marka dhankaas amaanka laga eego, Soomaaliya waxaa la dhihi karaa waa dalka ugu saameynta badan ee wax ku weynaya wayraxsanaanta Trump, taasoo ay sii xoojinayso hay'adihii dowliga ahaa oo aan weli xoogeysan iyo dowladda oo deegaano badan oo koonfurta Soomaaliya kuyaala aan gacan ugu jirin.

Haddaba, arragtida Trumpism-ga ee sida xawliga ah looga dhaqan galinayo danaha Maraykanka ee caalamka kala dhaxeeya, iyadoo aan loo eegeyn heerka xiriir ay dalalkaas la lahaayeen Maraykanka, waxay ku tusinaysaa in adduunku u wareegay jiho cusub oo aan la saadaalin karin, oo hubanti-la'aan ah, Afrikana waxa ay ku qaadan muddo dheer in ay ka soo kabato xiritaanka USAID oo lagay yaabaa inuu ka kiciyo wahabkii iyo caajiskii saarnaa qaaradda sanadihii badnaa ee Maraykanku quudin jirey oo la arko Afrika oo isku tashanaysa oo hoos u eegaysa kheyraadka dhex ceegaaga dhulkooda.

Si kastaba ha ahaatee, Trump si aan ula kac ahayn ayuu Afrika u siiyay fursad dahabi ah. Qaaradda Afrika waxay haysataa fursad haddii ay si xirfadaysan uga faa'iidaysato.

**W/Q: Maxamed Mire**

Trumpism: *Waa erey bixin siyaasi ah oo nuxurkeedu yahay; inuu Madaxweynuhu ka sarreeyo sharciga, waxayna ku soo arooraysaa aragtida "Midigta Fog" ee xagjirka ah. Ereyga-na waxaa laga soo dhanbalay magaca Trump, wuxuuna bilowday adeegsikiisu 2016kii.*



**Xigashada Sawirka:** Reuters

# SOO LABA KACLEYNTA AL-SHABAAB

## MAXAY KU KEENI KARTAA MUSTAQBALKA SOOMAALIYA?

Mustafe Cismaan



**Xigashada Sawirka:** Reuters

Markii Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud uu xilka qabtay bishii May 2022-kii, wuxuu ku dhawaaqay in uu maleeshiyadda Al-Shabaab ka cirib tiri doono dalka, isagoo sameeyay guluf aan hore loo arag oo ay hoggaaminayaan maleeshiyaadka deegaanka ee loo yaqaan 'Macawisley'.

Inkastoo howlgalladii militari ee 2022-2023-kii ay horseedeen guulo muhiim ah, haddana horraantii 2024-kii, waxaa soo ifbaxay dib u gurasho dowladda iyo dib u xoogaysiga Al-Shabaab. Dowladda oo xilligan xoogga saartay wax ka beddelka dastuurka kumeelgaarka ah iyo dib u habeynta nidaamka doorashooyinka ayaa hoos u dhigtay diiradda dagaalka ka dhanka ah maleeshiyada, taasoo fursad siisay Al-Shabaab, oo dib u la wareegtay qaar ka mid ah deegaanadii horey looga xoreeyay.

## WEERARRO XOOGGAN IYO XEELAD BEDDELKA AL-SHABAAB

Bishii Febaraayo 2025-ka, Al-Shabaab waxay qaaday weerarro ballaaran oo ku wajahan gobollada Shabeellaha Hoose/Dhexe, Hiiraan, Baay iyo Bakool. Weeraradaas oo ahaa kuwo ballaaran oo kooxdu soo qaaday, waxay muujinayaan xeelado cusub oo kooxda ay adeegsaneyso. Qiyaastii 3,000 oo dagaalyahan ayaa kooxdu kasoo qaatay gobolada ay ku xoogantahay sida Jubbada Dhexe iyo Gedo, maleeshiyaadkaas oo loo xilsaaray inay dib u qabsadaan magaalooyinkii muhiim ahaa ee kooxdu lumisay sanadihii la soo dhaafay.

Sidoo kale, 18-kii Maarso 2025-ka, Al-Shabaab waxay la beegsadeen qaraxyo miino ah kolonyo uu la socday Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud, xilli uu mrayay degmada Xamar Jajab ee Muqdisho kuna sii jeeday garoonka diyaaradaha si uu u tago furimaha dagaalka ka dhanka ah Al-Shabaab ee maamulka Hirshabelle. Weerarkan ayaa muujiyay sida ay kooxda u tahay mid weli awood leh oo bartilmaameedsan karta masuuliyiinta ugu saraysa dowladda.

## MAXAA KEENAY SOO LABA KACLEYNTA AL-SHABAAB?

Waxaa jira dhowr arrimood oo suurtagal ka dhigay soo laba kacleynta Al-Shabaab, waxaana kamid ah dagaalka oo hagad ku yimid, iyadoo dowladdu u muuqato mid aan si joogto ah u sii wadayn dagaalkii ka dhanka ahaa Al-Shabaab, taasoo keentay in kooxda ay hesho waqti ay isku abaabusho. Waxaa intaas dheer in beelaha deegaanka qaarkood ay ka niyad jabeen dowladda kadib markii ballanqaadyadii hore aysan si buuxda u fulin.

Sidoo kale, khilaafyada siyaasadeed ee u dhexeeya madaxda federaalka iyo dowlad goboleedyada ayaa sababay is aaminaad la'aan. Tusaale, Puntland waxay si cad u sheegtay inay diidan tahay wax ka beddelka dastuurka kumeelgaarka ah, halka duulaankii ay dowladda federaalka ku qaaday Raaskambooni uu xumeeyay xiriirka maamulka Jubbaland iyo dowladda dhexe.

Waxaa kale oo jirta dhaqaale yari, iyadoo lacagihii lagu maalgelin jiray dagaalka uu hoos dhac ku yimid, taasoo adkeysay sidii dowladda ay u sii wadi lahayd dhaqaalaha ku baxa howlgallada. Beesha caalamka oo markii hore ballan qaaday taageero militari iyo mid dhaqaale, ayaa dib u dhigtay qaarkood, taasoo keentay in ciidamada loo waayo agab ku filan.

Xiriirka Al-Shabaab iyo beelaha ayaa iyana qeyb ka ah, maadaama kooxdu ay si weyn ugu adeegsatay tabaha la xiriira dagaalka marin habaabinta bulshada. Waxay gacan siiyeen beelaha qaar, iyagoo isku muujinaya in ay yihiin nidaam maamul oo shaqeynaya, waxayna sameeyeen adeegyadii dowladda laga filayay sida garsoor iyo amni deegaan, sidoo kalena cafis u fidiyey dadkii deegaanka ee garab siiyey dowladda, tabtan oo ah kuwa ku cusub saaaxada halganka Al-Shabaab, oo socday in ka badan 20-sanno.

# AL-SHABAAB IYO SUURTAGALNIMADA SOOMAALIYA OO NOQOTA SIDII AFKAANISTAAN

Weerarada sii xoogeystay ee Al-Shabaab ee bilihii u dambeeyay waxay dib u kicisay doodda ah in Soomaaliya ay wajahayso xaalad u eg tii Afkaanistaan. Bishii Agoosto 2021-kii, Taalibaan waxay si dhakhso leh u la wareegeen caasimada Kaabuul kadib markii Maraykanku uu ka baxay Afgaanistaan halkaas oo kooxaha Al-Qaacida iyo Taalibaan kula dagaalamayay muddo 20-sanno ah. Inkasta oo xaaladda Soomaaliya ay ka duwan tahay midda Afgaanistaan marka laga eego dhinacyo kala duwan, haddana waxaa jira xogo muujinaya in haddii dowladda aysan si dhab ah u maareyn dagaalka Al-Shabaab ay dib u hanan karaan dhul ballaaran oo dalka kuyaala.

Al-Shabaab weli waxay maamushaa qayb weyn oo ka mid ah bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, iyadoo qiyaasaha qaar tilmaamayaan in kooxdaas ay gacanta ku hayso in ka badan **30%** dhulka dalka.

Waxaa jirta xog sheegaysa in Al-Shabaab ay bedeshay qaabkeedii hore ee halganka iyadoo casharo ka baranaysa Taalibaan, ayna qaabkeeda hadda kadib ku salaynayso mid maxali oo gudaha Soomaaliya keliya ah halkii awal qorshaheedu ahaa kan caalamiga ah ee Al-qaacida. Arrintan ayaa laga yaabaa in dad badan oo ka niyad jabay khilaafyada, maamul xumada, musuqmaasuqa iyo cadaalad darada dabo-dheeraaday ee dalka ka jira in ay siiso fursad ay Al-Shabaab uga faa'idaysan karaan oo ay dad badan uga dhaadhicin karaan afkaartooda kuwaasoo u arki kara xalka keliya ee Soomaaliya in ay Al-Shabaab yihiin.

Sidoo kale, iska hor imaaadyada qabaa'ilka ee soo noqnoqda oo maamuulada kala duwan ee dalka ka jira ay ku fashilmeen in xal waara laga gaaro ayaa fursad u abuuri kara Al-Shabaab, iyagoo lagu soo dhaweyn karo deegaano cusub oo ay si buuxda u la wareegi karaan.

Soomaaliya kama jirto dowlad leh awood ciidan oo isku filan, waxaana weli laga maarmaan ah taageerada caalamiga ah, iyadoo ay jirto niyad-jab dalalka taageerada siiya Soomaaliya. Ciidamada ATMIS (African Union Transition Mission in Somalia) oo horey loo oran jiray AMISOM, ayaa qorsheynaya in ay dalka ka baxaan 2024/2025, taasoo sii xoojinaysa walaaca ah in marka ciidamada shisheeye baxaan, Al-Shabaab ay dib u hanan karto dhul badan.

## MAXAA LA GUDBOON DOWLADDA?


Si looga hortago in Soomaaliya ay si buuxda u gasho gacanta Al-Shabaab, dowladda waa in ay qaadaa tallaabooyin dhowr ah:

1. Dib u eegista istiraatiijiyadda dagaalka: Waa in dowladdu ay dejisaa qorshe dagaal oo mideysan, lana xoojiyo iskaashiga ay la leedahay maamul goboleedyada, si loo xaqiijiyo in dagaalku uusan noqon mid ku kooban hal gobol oo keliya.
2. Xoojinta ciidanka xoogga dalka: Dowladda waa inay si deg deg ah u dhistaa una abaabushaa ciidan qaran oo leh qalab casri ah, si ay ula wareegaan doorka ATMIS iyo ciidamada shisheeye.
3. La dagaallanka fikirka xagjirka ah: Kaliya in lagu ekeeyo dagaalka militari kuma filna. Waa in dowladda ay si xeel dheer u la dagaallanto afkaarta xagjirka ah ee ay Al-Shabaab faafinayaan, lana sameeyo barnaamijyo waxbarasho oo ka hortagaya marin-habaabinta dhallinyarada.
4. Heshiis siyaasadeed oo lagu mideynayo dalka: Maadaama khilaafka siyaasadeed uu caqabad weyn ku yahay dagaalka Al-Shabaab, waa in la helaa heshiis siyaasadeed oo ay ku mideysan yihiin dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada.

**W/Q: Mustafe Cismaan Faarax**

# ISLAAMKA IYO NOLOSHA

Zaki Rabiica



**Xigashada Sawirka:** Masjid Cali Jimcaale

Islaamku waa diin dhameystiran oo kulansatay dhammaan qaybaha la xiriira nolosha qofka, haba ugu badnaatee dhinacyada xiriirka uu qofku la leeyahay Rabbigiis, naftiisa, iyo bulshada uu ku dhex nool yahay. Islaamku ma ahan oo kaliya diin ku saleysan cibaadada sida salaadda iyo soonka, balse waa nidaam dhameystiran oo hagaya nolosha adduun iyo tan aakhiraba; sida uu sheegay Shiikh Xasan al-Bannaa:

"Islaamku waa nidaam dhameystiran oo koobaya dhammaan qaybaha nolosha. Waa dawlad iyo dal, ama waa xukuumad iyo ummad, waa akhlaaq iyo awood, ama waa naxariis iyo caddaalad, waa aqoon iyo sharciga, ama waa cilmi iyo garsoor. Waa hanti iyo maal, ama waa tacab iyo hodannimo. Waa jihaad iyo dacwo, ama waa ciidan iyo fikrad, iyo sidoo kale waa caqiido sax ah iyo cibaado sugan labadaba."

Hadalkaan muhiimka ah ee Xasan al-Bannaa wuxuu ina xasuusinayaa in Islaamku yahay nidaam dhameystiran oo aan waxba ka maqneyn nolosha qofka, xitaa qaybaha ugu yar ee nolosha maalinlaha ah. Islaamku wuxuu leeyahay hannaan adag oo uu qofka ku hago hab nololeedkiisa iyo dabeecadihiisa kala duwan.

# SADDEXDA QAYBOOD EE ISLAAMKU NOLOSHA KA HAGAYO

## 1. XIRIIRKA QOFKA IYO ILAAHIIS:

Islaamku wuxuu dhigayaa in qofka uu leeyahay xiriir toos ah oo joogto ah oo uu la leeyahay Rabbigiis. Waa xiriir ku salaysan cibaado, oo qofka xusuusinaya jiritaanka Eebbe iyo muhiimadda ku tiirsanaanta naxariistiisa. Qur'aanka Kariimka ah ayaa sidaan noogu tilmaamaya:

"وما خلقت الجن والإنس إلا ليعبدون"

"Jinni iyo insi waxaan cibaadadayda ahayn umaanan abuurin"

Cibaadada sida salaadda, soonka, sakada, iyo xajka waxay tusaale u yihiin sida Islaamku uu muhiimad gaar ah u siinayo xiriirka qofka iyo rabigiis ka dhexeeya, xiriirkaas oo ah mid toos ah oo aan cidna loo marayn, waana midda uu islaamku uga duwan yahay diimaha kale oo qofku uu ku khasban yahay in uu sii maro Raahib ama oday diimeed ku xira hadba cidda uu caabudayo.

## 2. XIRIIRKA QOFKA IYO BULSHADA:

Islaamku wuxuu sidoo kale si xoog leh uga hadlayaa sida qofka muslimka ah uu ula dhaqmo bulshada uu ku dhex nool yahay. Waxaa lagu amrayaa inuu wanaag iyo caddaalad kula dhaqmo dadka, oo uu wanaag la jecleysto walaalkiis sida uu naftiisa ula jecel yahay. Nebi Muxammad (NNKH) wuxuu yiri:

"لا يؤمن أحدكم حتى يحب لأخيه ما يحب لنفسه"

"Midkiin ma rumeeyo si buuxda ilaa uu walaalkiis la jecleysto waxa uu naftiisa la jecel yahay."

Waxaa muhiim ah in qofka muslimka ah uu wanaag u sameeyo dhammaan bulshada, iyadoon loo eegin diintooda ama haybtooda. Islaamku wuxuu farayaa in qofka laga caawiyo sidii xal loogu heli lahaa dhibaatooyinka bulshada soo wajaha, ha ahaato caddaalad-darro, saboolnimo, ama caafimaad la'aan.

## 3. XIRIIRKA QOFKA IYO NAFTIISA:

Islaamku wuxuu sidoo kale hagaa xiriirka qofku la leeyahay naftiisa. Waa muhiim qofka inuu ku noolaado xeerarka diinta, kana fogaado waxa naftiisa dhibaya sida xumaanta, isla markaana ku tiirsanaado wanaagga iyo dhaqan wanaagga. Qur'aanka Kariimka ah wuxuu tilmaamayaa dhibaatada nafta ay keeni karto haddii aan laga taxadarin, isagoo leeyahay:

"إن النفس لأمارة بالسوء إلا ما رحم ربي"

"Naftu waa farid badantahay xumaanta, naxariista Eebahay mooyee, Eebahayna waa naxariiste dambi dhaafa."

Qofka muslimka ah waa inuu si wanaagsan ula dhaqmo naftiisa, isaga oo ka fogaanaya waxyaabaha burburin kara caafimaadkiisa, sharaftiisa, iyo noloshiisa guud ahaan. Islaamku

wuxuu nafta ka ilaaliyaa xumaanta, wuxuuna ku hagaa waddada toosan ee nafta dhaqankeeda lagu wanaajinayo.

## ISLAAMKU WAA DIIN DHAMAYSTIRAN

Diintu ma ahan oo kaliya cibaado lagu guto masaajidda oo keliya, ee waa nidaam dhameystiran oo wax ka qabta dhinac kasta oo ka mid ah nolosha qofka iyo bulshada. Islaamku wuxuu nidaamiyaa:

### 1. DAWLAD IYO HOGAAMIN:

Islaamku wuxuu leeyahay nidaam hufan oo lagu hagayo hogaaminta bulshooyinka iyo dawladnimada. Waa nidaam ku salaysan caddaalad iyo masuuliyad, iyadoo dadka hogaamiyeyaasha ah ay laga doonayo in ay xilalkooda si wanaagsan u gutaan, taasoo Qur'aanka iyo Sunnada Nebiga (NNKH) ay si wanaagsan u sharraxaan.

### 2. AQOONTA IYO CILMIGA:

Islaamku wuxuu si weyn u dhiirrigelinayaa barashada cilmiga iyo aqoonta. Nebi Maxamed (NNKH) wuxuu yiri:

"طلب العلم فريضة على كل مسلم ومسلمة"

"Barashada cilmiga waa waajib saaran qof kasta oo muslim ah, rag iyo dumarba."

### 3. CAAFIMAADKA IYO NOLOSHAADA:

Islaamku sidoo kale waxa uu muhiimad gaar ah siiyaay caafimaadka qofka iyo qiimaha uu u leeyahay nolosha; isaga oo waxkasta oo dhib ku ah caafimaadka qofka uu islaamku mamnuucay, waxkasta oo qayb ka qaadanaya wanaajinta caafimaadkana dhiiri galiyay.

### 4. SHARCIGA IYO CADAALADDA:

Cadaaladda iyo kala dambayntu waa mid ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee islaamka asaaska u ah, islaamku waxa uu jideeyay nidaam dhamaystiran oo sharci iyo kala dambayn ah, cadaaladduna asal iyo tiir dhexaad u tahay.

## GUNAANAD

Qormadaan waa bilowga taxane qormooyin ah oo aan kaga hadli doono sida Islaamku u nidaamiyay dhammaan dhinacyada nolosha. Qormooyinka soo socda, waxaan labadii todobaadba mar uga hadli doonnaa qayb gaar ah oo Islaamku nidaamiyay, sida dawladnimada, aqoonta, caafimaadka, iyo sharciga.

**W/Q: Sakariya Axmed Maxamed (Rabiica)**



**Xigashada Sawirka:** Rueters

# RAJADA DOWLAD-DHISKA SOOMAALIYA OO HUBANTI LA'AAN AH:

## Maxaa samatabixin kara?

**Axmed Siciid Muuse (Axmed Barre)**

Toban sano ka dib qaran-jabkii Soomaaliya 1991-dii, waxaa dalka ka hanaqaaday nidaam dowladeed oo ku dhisan habka Federaalka, kaaasoo tiirar looga dhigay wax qaybsiga beelaha ee afar-iyo-bar (4.5). inkastoo lagu soo caana-maalay, haddana waxaa soo baxay in nidaamka la qaatay ee federaalka iyo tiirarkiisuba caqabad ku yihiin dowlad-dhiska Soomaaliya.

Si faham guud looga qaato, waxaan dib u milicsanayaa waxa sababay burburkii dowladinimadii Soomaaliya. Waxaa jirey arrimo badan oo sababay qaranjabka balse waxaan ugu waa-weynaa sida cadaalad darro baahdey taasoo keentay in dad badan kalsooni-darro ka muujiyeen nidaamkii jirey, cid kasta oo ka gadoodda caddaalad-daradaasna waxaa lagu qabtay gacan bir ah iyo ciqaab aan kala sooc lahayn, taasoo ma-hadhooyinkii ay reebtay weli xasaasiyadeedii ay jirto.

Waxaa kale oo kamid ah in xukunkii keligii talis ahaa mudaddii uu xilka hayey dheeraatay, kaasoo dhamaan awoodaha dowladnimada hal gacan isugu geeyey. Waxayna sababtay in waxyaabo badan oo dhib ah laga tirsado. Dadkuna jeclaystaan dhicitaankeeda iyagoo aan ka fekerin saamaynta taban ee ka dhalan karta marka uu xukunka iyo kala damabyntu ay meesha ka baxo.

Sidoo kale, jabhadihii xukun raadiska ahaa oo qaab qabiil u abaabulnaa ayaa ka fii'iideysanayey tabashada bulshada, kuwaasoo ay hormuud ka ahaayeen shaqsiyaad xulkun doon ah. Jabhadahan ayaa dabada la galay dowlad ay cadaawad soojireen ahi kala dhexayso Soomaalida, kadibna wiiqay awooddii iyo haybaddii dowladda Soomaaliya, kuwaasoo ugu dambayntii soo dedejiyey burburkii dalka iyo dowladnimadii.

Haddaba, dib u yagleelidii jamhuuriyadda cusub ee Soomaaliya ee sanadkii 2000, waxaa dib u soo if-baxay isla cilladihihii burburiyey dalka, haddii ay ahaaan lahayd dulmigii shaatiga dowladnimada loo gelinayay, keligii talisnimadii hoggaanka xukunka jooga iyo jabhadihii oo qaab qabiil u abaabulan (dowlad-goboleed xuduud qabiil leh), dana shisheeyana fulinaya.

Xilligan hadda la joogo rajada dowladnimo ee dalku waxay maraysaa meeshii ugu hoosaysey arrimahan soo socda awgood:

- Dowlad-dhiskii dalka oo dib u dhac ku yimid, iyadoo dowlad-goboleedyadii iyo dowladdii federaalku isku fahmi la'yihiin dastuurka, xeerarka dalka, maamul-daadejinta, wadaagga hantida iyo khayraadka dalka iyo guud ahaan jihada dalku hayaanka u yahay.
- Ururrada xagjirka ee dagaalka kula jira dowladda oo si aan hore loo arag u soo xoogeystey sida ISIS-da buuraha Calmiskaad ku sugan iyo Al-Shabaab-ka koonfurta dalka ka dagaalanta. Taasoo muujinaysa in awoodda difaac iyo wardoon ee dowladdu hoos u sii socoto.
- Beeshii caalamka oo ka daashay taageerada dowlad-dhiska Soomaalida, maadaama wax horumar ah laga gaari waayey sanado badan. Taasoo keentay in ciidamadii nabad illaalinta loo waayey dhaqaale lagu masruufo, haddii ciidamada shisheeye dalka ka baxaanna waxaa dhici kara in qaar ka mid ah ururada xagjirka ahi dalka intiisa badan qabsadaan.
- Isbedelka ka dhacaya adduunka ayaa isna qayb weyn ku yeelan doona mustaqbalka dalka. Dib u doorashadii madaxweyne Donald Trump waxay adduunka u jeedisey jiho cusub. Dal walbana wuxuu u diyaargaroobayaa inuu isku tashado dhaqaale ahaan iyo cudud ciidan ahaanba, taasina waxay yaraynaysaa taageeradii amni, dhaqaale iyo bini-aadanimo ee Soomaalida la siin jirey.
- Saamaynta siyaasadda dowladaha gobolka ayaa iyaduna Soomaaliya xaalkeeda uga sii daraysa. Damaca Itoobiya ee helitaanka marin biyood iyadu leedahay ayaa ah kan ugu daran ee Soomaaliya wadajirkeeda dhuleed saamaynta xun ku yeelan doona. Waxaana jira dowlado waaweyn oo arrintaas ku taageeraya Itoobiya iyo hoggaamiyeyaal (horgalayaal) Soomaaliyeed oo arrinkaas loo adeegsan doono.

- Madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) oo ku mashquulsan dib-isu doorashadooda, iyagoo ka shaqaynaya hanaan doorasho oo aan la isku raacsanayn ayaa aad u kordhisey raja xumaddii awalba jirtey.

- Waxaa kale oo jirta in madaxda DFS heshiisyo qarsoodi ah ay la galeen dowlado badan, sida heshiisyo amni, dhaqaale iyo istaatiijiyadeed, kuwaasoo aan u adeegeyn danaha iyo aayaha umadda Soomaaliyeed balse ku salaysan dano-khaas oo waqti kooban ah.

- Dagaalada qabaa'ilka ee ku salaysan deegaanka, daaqsinta iyo xukunka ayaa dalka oo dhan dib uga bilawday. Koonfurta, bartamaha iyo waqooyigaba waxaa ka socda dagaal beeleedyo aan wax xikmad ah ku dhisnayn. Dagaaladaas oo dalka ku celiyey saansaan u eg 1991-dii.

- Dhaqaalaha dalka ayaa xilligan wuxuu marayaa meeshii ugu hooseysey (Sagxadda), kasoo laga dareemay dhamaan dhulka Soomaalida. Waxa sababay dhaqaale la'aanta ayaa loo aananayn karaa colaadaha joogtada ah, amni xumada, qalalaasaha siyaasadeed iyo saamaynta dhibaatooyinka dhaqaale ee adduunka ka jira ee ay sababeen dagaalada Yugraayn iyo Falastiin, iyo ka soo kabashada caalamka ee cudurkii Covid-19.

- Maamulkii, xukunkii iyo hantidiiba waxay, heer federaal iyo maamul-goboleedba, ku urureen gacanta laanta fulinta, taasoo sababtay in ay meesha ka baxdo isla-xisaabtankii iyo kala-madaxbannaanidii hay'adaha dastuuriga ah ee dalka. Waxayna madaxda dowladda heer kasta u fududaysay musuqmaasuq, eex iyo xukun iyo hanti boob aan la qarsanayn.

Arrimahaas aan kor ku soo sheegnay oo dhan waxay muujinayaann in rajaddii dowlad-dhiska Soomaaliya ay gashay xaalad hubanti la'aan ah, lagana yaabo in ay kasii darto haddii aan degdeg wax looga qaban.

Haddaba, maxaa laga qaban karaa si loo badbaadiyo nidaamka dowladnimo?

- In Soomaalida loo sameeyo dhab-u-heshiisiin, madaama weli ay jirto is aaminid la'aan baahsan beelaha dhexdooda. Ma suuroobi karto in dowlad ay wadaagaan bulsho kala shakisan oo aan ka daawoobin boogihii dagaalka sokeeye, welina aan isu celin hantidii ay kala qaateen, isagana garaabin dhibtii ay isu geysteen.


- In nidaamka dowladnimo ee hadda jira dib loo fiiriyo. Federal-ka ku salaysan dowlad-goboleedyo qaab-beeleed ku dhisan iyo wax-qaybsiga kuraasta ee 4.5, ma keenayaan dowladnimo la mahadiyo. Sidaas awgeed, waa in Soomaalidu dib uga fekertaa nidaamka dowladnimo ee ku haboon ee ay qaadan karaan iyagoo duruufohooda waafajinaya.

- In madaxda dowladdu ka tanaasulaan damaca awood maroorsiga iyo raadinta doorasho aan laysla ogolayn, islamarkaasna dastuurka iyo xeerarka dalku noqdaan kuwo la isla ogol yahay, marjicna u noqda talaabo kasta oo la qaadayo.

- In madaxda dowladdu dadka u soo bandhigaan heshiisyada qarsoodiga ah ee saamaynta ku yeelanaya aayaha ummadda, loona qabto khubaro aqoonyahan ah oo ka dooda, ka dibna la mariyo habraaca sharciga ah ee heshiisyada, lagana ansixiyo golayaasha dowladda iyadoo aan galangal iyo saamayn taban xukuumaddu ku yeelanayn go'aamadooda.

Ugu dambayntii, madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waxaa laga rabaa inay awoodooda isugu geeyaan difaaca dalka iyo midaynta bulshada, kana tanaasulaan waxyaalaha bulshada qaybinaya ee ay faraha kula jiraan. Maamul-goboleedyada Soomaalidana waxaa laga rabaa in ay muujiyaan tanaasul iyo wadashaqayn xilligan adag. Waana in laga hortagaa damaca shisheeyaha ee dhaawacaya midnimada dhulka Soomaaliyeed. Ugu dambayntana laysugu yimaadaa sidii dowlad Soomaaliyeed oo sal-adag oo la wada ogol yahay sees loogu dhigi lahaa.

**W/Q: Axmed Siciid Muuse (Axmed Barre)**



Xigashada Sawirka: Alamy

# SHEEKO QARAN

## Sooyaalka halgamadii gobannimo doonka Soomaaliyeed (Qaybta 1-aad)

Cabdirashiid Maxamed Cabdi

Dadka Soomaalidu waa dad deggan qaarradan Afrika gaar ahaana Geeska Afrika, waa bulsho deggan dhul badan oo ka mid ah Geeska Afrika una yaala hab filiqsanaan ah, kuwaas oo maanta ah afar dowladdood oo ka dhisan gobolka oo kala ah Soomaaliya, Itoobiya, Kiinya iyo Jabuuti.

Si lamid ah bulshooyinka kale ee Afrika ama Aasiya, dadka Soomaalida waxaa soo maray halganno kala duwan oo ay kaga soo horjeedeen gumaystihii doolka ahaa ee rabay inuu qabsado dalka Soomaaliyeed, waa tii uu lahaa (AHN) Abwaan Aadan Af-qalooc:" Samaan laguma doonee xornimo, wa sange u fuule, sallax dakhar leh, meyd soobiriyo, seedo waran gooya, soofkoo la kala qaado, iyo siigo kor u duusha, haweenkoo gambada saydha, iyo sebi agoomooba, libintuba waxay saaran tahay, suluf coladeede".

Marka la barbardhigo dadyawga kale ee dunida, dadka Soomaalidu kali kuma aha qaybsannaanta dhuleed ee uu gumaystihii reer Yurub qaybiyay dhulkooda, oo uu ka dhigay dalal kala duwan, ee waxaa jira qowmiyado kale oo ay saamaysay qaybintii gumaystaha reer Yurub ee dhulka Afrika, waxaana kamid ah dadka Masaayga (Masaai) oo ah dad xoolo dhaqato ah gaar ahaan lo'da ooy caan ku yihiin, tiro ahaana lagu qiyaaso sideed Malyan (8 million) oo dagan wadamadda Kiinya iyo Tansaaniya.

Sidaas si lamid ah, qowmiyada Tuwaariiqdu waxay kamid yihiin dadkii uu gumaystihii reer Yurub qaybiyay dhulkooda, uusanna jirin dal kaligood gaar u leeyihiin, waxay dadkani caan ku yihiin dhaqashada xoolaha siiba geela, waxayna deegaan ahaan dagaan dhulka saxaraha laga soo bilaabo galbeedka Liibiya ilaa koonfurta wadanka Aljeeriya, waxay ka tirsan yihiin wadmada Liibiya, Aljeeriya, Maali Nayjar iyo Burkiino-Faaso oo dhamaantood ka tirsan wiqooyiga iyo galbeedka Afrika.

Qaybsannaanta dadyawgu kuma koobna oo keliya Afrika ee waxaa jira qowmiyado dagan qaarada Aasiya oo sidaas oo kale uu gumaystuhu kala irdheeyay dadkii iyo dhulkii ay daganaayeen, laakiin waxaa jira qawmiyado badan oo tiro ahaana ka badan Soomaalida oo aan lahayna dal ay gooni u leeyihiin sida Soomaalida, dadyawgaas waxaa kamid ah qowmiyada faca weyn ee Kurdida oo lagu qiyaaso tiro ahaa afartameeyo milyan (40 milyan) oo qayb ka ah waddamada Ciraaq, Suuriya, Turkiga iyo Jamhuuriyada Iiraan.

Sidoo kale qowmiyada Malaaya (Malay) ee daggan koonfurta bari ee Aasiya, oo tiro ahaan lagu qiyaaso sideed iyo toban malyan (18 milyan) oo kala deggan dallalka Malaysiya, Burunaay (Brunei) iyo Induniisiya, waxay kamid tahay dadka uu gumaystihii reer Yurub qaybiyay dhulkoodii kuna beeray dadka kale oo aan Malaay ahayn sida Shiinayska iyo Hindida.

Dadka Soomaaliyeed gumaystaha ku soo duulay dhulkooda waxay kaga jawaabeen iska caabin iyo halgan ay ku soo ceshanayaan gobonnimadii iyo xorriyadii dhulkooda, waxay halgannadaas soo bilaabeen qarnigii 10-aad ee taariikhda miilaadiga, xilligaas oo boqortooyooyinka ka jiray ay kamid ahaayeen Adal, iyo Ifat oo ka talin jirey Zaylac ilaa Harar ay iska caabiyeen duullaankii Boqortooyadii Abyssinia (Itoobiya) oo rabtay in ay dhulkaas qabsato, taas oo markii dambe ay halgankaas qayb ka noqdeen Imaam Axmed Guray iyo ciidankiisii oo aakhirkii ku geeriyooday halgannkaas 1543-dii. Laga soo bilaabo xilligaas dhulka Soomaalidu waxuu la kulmayay duullanno ka imaanayay gumaystihii reer Yurub iyo Boqortooyadii Abyssinia (Itoobiya).

Shirkii Berlin ee dhacay 1885-tii wuxuu ahaa shir looga tashanayay qaybsashada dhul-waynihii qaarada Afrika, dhulka Soomaaliduna waxa uu kamid ahaa goofafkaas lagu kala jarayay miisaska Yurub, waxaana loo goos goostay sidan:

Ingiriiska oo ugu tun waynaa meesha wuxuu qaatay dhulka Soomaali galbeed (Ogaadeeniya) oo isku dhan, waqooyiga Soomaaliya (British Somaliland) iyo gobolka waqooyi bari ee Kiinya (NFD), Faransiisku wuxuu qaatay dhulkii xeebta Soomaalida ee Jabuuti, halka Talyaaniguna qaatay gobolladii Koonfureed ee Soomaaliya (Italian Somaliland).

**W/Q: Cabdirashiid Maxamed Cabdi**

# DHIBAATADA SHAQO LA'AANTA EE DHALLINYARADA PUNTLAND:

## MA MAAMUL-XUMO MISE MOOGAAN SIYAASADEED?



Siciid Abshir Yuusuf

**Xigashada Sawirka:** Puntland State House

Shaqo la'aanta dhallinyaradu waa arrin adag oo laga eegi karo dhinacyo kala duwan, waxaana dalal kala duwan ay u sameeyeen qeexitaanno ku saleysan baahiyahooda. Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO) wuxuu shaqo la'aanta dhallinyarada ku qeexay inay tahay boqolkiiba dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 29 jir ee diyaar u ah inay shaqeeyaan, balse aan helin shaqo. Ururka Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarka (OECD) wuxuu ku xaddiday shaqo la'aanta dhallinyarada inay tahay dadka 24 sano jira iyo wixii ka yar ee muddo afar toddobaad ah si firfircoon shaqo u raadinayay.

Erayga "dhallinyaro" guud ahaan wuxuu tilmaamayaa xilliga qofka uu ka soo baxayo carruurnimada kuna socdo qof wayn. Qeexitaankan waa lagu kala duwanaan karaa iyadoo ku saleysan dhaqammada, siyaasadaha, iyo xaaladaha dhaqaale ee dalalka, taasoo ka dhigaysa mid adag in la helo qeexitaan guud oo si joogto ah loogu isticmaalo. Tusaale ahaan, Axdiga Dhallinyarada Afrika wuxuu qaadanayaa qeexitaan ballaaran, isagoo dhallinyarnimada ku koobaya dadka da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 34 sano.

Puntland oo ah maamul goboleed katirsan dowladda federaalka Soomaaliya, taasoo la asaasay sanadkii 1998-dii ayaa leh bulso badan oo dhallinyaro ah, iyadoo ay da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 35-sanno jir, sida lagu sheegay warbixin ay daabacday UNDP 2021-kii. Walow kumanaan dhallinyaro ah ay ka baxeen jaamacadaha maxaliga ah iyo kuwa dibada, intooda badan ayaa wajahaya caqabad ah sidii ay u heli lahaayeen shaqo.

Daraasado kala duwan oo Puntland laga sameeyay intii u dhaxaysay 2019-kii ilaa 2022-kii ayaa muujinaya in heerka shaqo la'aanta haysata dhallinyarada Puntland ay gaarsiisantahay qiyaastii 50%, taasoo muujinaysa in kala bar dhallinyarada ay shaqo la'aan yihiin. Sidoo kale sahanka shaqaalaha oo markii ugu horeysay Wasaaradda Qorshaynta Puntland samaysay oo la daabacay sanadkii 2020-kii, ayaa lagu sheegay in 22% dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 15 ilaa 29-sanno oo ku sugan magaalooyinka Puntland ay shaqo la'aan yihiin.

## MAXAA SABAB U AH SHAQO LA'AANTA DHALLINYARADA PUNTLAND

Inkastoo daraasadaha laga sameeyay shaqo la'aanta dhallinyarada Puntland ay is-khilaafsan yihiin marka la eego heerka boqolkiiba ee la xusay, haddana waxaa jirta xaqiiqo ah in xaalado dhaqaale xumo oo soo wajahday gobolka sanadihii u dambeeyay sida caabuqii Covid-19 uu sababay in fursado shaqo oo badan meesha ka baxaan. Sidoo kale, dhimashada Shillin Soomaaliga ayaa la aaminsan yahay inay gacan ka geysatay hoos u dhac dhaqaale oo saameyn ku yeeshay suuqyada iyo nolosha dadka.

Sida ay muujinayaan daraasado kala duwan, shaqo la'aanta dhallinyarada Puntland waxa ay salka ku haysaa sababo dhowr ah, kuwaas oo ay kamid yihiin fursadaha shaqo ee kooban iyo maamulka Puntland oo weli aan hirgelin qorshe cad oo ku aaddan shaqo abuurka dhallinyarada. Tusaale ahaan, ma jiraan barnaamijyo dowladeed oo si gaar ah loogu talagalay shaqo gelinta dhallinyarada.

Puntland kama jiraan xarumo ganacsi oo waaweyn sida warshado, kuwaas oo fursado shaqo u abuuri lahaa dhallinyarada. Tani waxay si toos ah sabab ugu tahay fursadaha shaqo ee xaddidan iyo tirada kooban ee shaqooyinka la heli karo, taasoo ka dhigaysa helitaanka shaqo mid aad u adag. Intaa waxaa dheer, goobaha yar ee shaqada laga helo ee Puntland ka jira ayaa badankood aan shaqaalaha ku xulan aqoontooda iyo khibradooda, balse lagu saleeyaa dano kale oo aan xirfad ku dhisnayn sida eex iyo qabyaalad. Arrintan ayaa horseeday in dhallinyaro badan ay ka niyad jabaaan nolosha gudaha, isla markaana ay u hayaamaan deegaanada kale sida Muqdsiho ama dibadda si ay u raadsadaan nolol dhaanta.

Hay'adaha dowladda Puntland weli ma aysan samayn dadaallo muuqda oo ballaaran oo lagu abuuro shaqooyin rasmi ah oo dhallinyarada u gaar ah. Inta badan hay'adahaasi ma lahan barnaamijyo qorshaysan oo si toos ah shaqo-abuur ugu sameeya dhallinyarada, taasoo keentay in kororka shaqo la'aanta uu si joogto ah u sii bato.

Maamul-xumada iyo musuqmaasuqa baahsan ee ka jira Puntland ayaa ah caqabad weyn oo hortaagan abuurista shaqooyin dhallinyarada. Siyaasiyiin aan dan ka lahayn danta guud ayaa si xun u maamulay khayraadka deegaanka, taasoo curyaamisay horumarka dhaqaale iyo koboca fursadaha shaqo. Natiijada arrintan ayaa ah in dhallinyaradii soo qalinjabisay ay la kulmaan shaqo la'aan baahsan, iyadoo musuqmaasuqa iyo ku takrifalka hantida dadweynuhu ay si toos ah u saameeyeen suuqii shaqada.

Is-bedel la'aantii madaxtinimada Puntland ka dhacday ayaa qeyb weyn ka ah shaqo la'aanta dhallinyarada haysata, sababtoo ah isbedelku waxa uu keenaa qorshayaal cusub iyo jihada siyaasadeed ee horumarinta bulshada, taasoo si toos ah u saameysa fursadaha shaqo ee dhallinyarada, iyadoo haddii aan la helin qorshe joogto ah iyo hogaamin xasilloon, horumarinta shaqooyinka aysan suurto gal ahayn. Sidoo kale, xukuumadda Siciid Cabdullaahi Deni ayaa amar ay soo saartay 2024-kii ku sheegtay in ilaa amar dambe ha'yadaha dowladda aysan shaqaale qori Karin, iyadoo aan la sheegin sababta.

Sidoo kale, nidaamka waxbarashada ee ka jira Puntland ayaa door weyn ku leh shaqo la'aanta dhallinyarada. Waxbarashadu inta badan waxay diiradda saartaa barashada xirfado xafiiseed, halka ay si aad u yar u tixgeliso xirfadaha farsamada gacanta iyo hal-abuurka shaqo. Daraasado kala duwan ayaa muujinaya in ay jirto is-waafaq la'aan u dhaxaysa xirfadaha ay ardaydu bartaan iyo baahiyaha dhabta ah ee suuqa shaqada, gaar ahaan waaxyaha wax-soo-saarka dhaqaalaha. Kala fogaanshahan ayaa noqday caqabad weyn oo si toos ah u sababta shaqo la'aanta dhallinyarada Puntland.

Sababaha suuragalka ah ee keena jahwareerkan waxaa ka mid ah in dhallinyarada Puntland ay aragti khaldan ka haystaan beeraha, xoolaha, kalluumaysiga, iyo waaxaha kale ee wax-soosaarka. Sidoo kale, nidaamka waxbarashada Puntland ayaa si joogto ah ugu guuldarraystay inuu diyaariyo dhallinyaro leh xirfado aqooneed oo ku habboon shaqooyin faa'iido leh. Waxaana la yaab leh in dhallinyarada yar ee soo barta culuumtan aysan ka faa'iidayn cilmiga ay barteen, balse badankood ay ka doorbidaan shaqooyinka xafiisyada dowladeed iyo ha'yadaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah.

Ugu dambeyn, joojintii Madaxweyne Donald Trump ee gargaarka dibadda ee Maraykanku bixiyo waxay sababtay in ha'yado badan oo caalami ah oo kuyaala Puntland ay xirmaan ama yareeyaan shaqaalahooda. Arrintan waxay si toos ah u saameysay boqolaal dhallinyaro ah oo ka shaqeyn jiray ha'yadahaas, taasoo sii kordhisay dhallinyarada shaqo la'aanta ah.

## SIDEE LOO XALLIN KARAA SHAQO LA'AANTA DHALLINYARADA?

Xaaladda shaqo la'aanta dhallinyarada Puntland ayaa haatan maraysa heer sare oo walaac leh, taasoo keentay in dhallinyaro badan oo wax soo bartay ka hayaamaan Puntland, sidaas darteed, waxaa muhiim ah in madaxda Puntland ee maanta xilka haya ay si dhab ah uga fikiraan sidii dhallinyarada loogu abuuri lahaa shqo iyadoo loo marayo qorsheyaal wax ku ool ah oo degdeg ah.

Waxaana muhiim ah in degdeg loo sameeyo qodobadan hoose si wax looga qabto arrintan:

1. Waxaa muhiim ah in la xoojiyo maalgashiga gudaha si loo abuuro fursado shaqo. Dowladda iyo hay'adaha maaliyadeed waa in ay sameeyaan dhiirrigelin ganacsi oo loogu talagalay inay dhallinyaradu ku maalgeliso mashaariicda iyo ganacsiyada cusub.

2. Waa in la kobciyo fursado xirfadeed iyo tababaro la xiriira suuqa shaqada si dhallinyarada loogu diyaariyo xirfadaha loo baahan yahay. Barnaamijyada tababarka xirfadaha gacanta iyo farsamada, iyo kuwa teknolojiyada, oo ka caawin kara dhallinyarada inay helaan shaqooyin faa'iido leh.

3. Waa in la sameeyo siyaasado taageero u ah ganacsiga yaryar iyo kuwa dhexe, iyo fududeynta hababka sharci ee maalgashiga iyo ganacsiga, oo dhallinyarada ka caawin kara inay fursado shaqo abuurtaan.

4. Waa in dowladdau ay la gaashato shirkadaha waaweyn iyo hay'adaha caalamiga ah si ay u abuuraan mashaariic waaweyn oo shaqo abuur ah, iyadoo sidoo kale la dhiirrigelinayo shirkadaha maxalliga ah inay shaqooyin cusub abuuraan.

5. In dhallinyarada laga taageero inay bilaabaan ganacsi ama barnaamijyo hal-abuurnimo ah oo ka jawaabaya baahiyaha bulshada, taasoo abuuri karta fursado shaqo oo cusub.

6. In la sameeyo barnaamijyo dhiirrigeliya shaqo abuurka dhallinyarada, sida deeqo iyo amaahyo fudud oo loogu talagalay inay ku bilaabaan mashaariic, waxay abuuri kartaa fursado shaqo iyo horumar.

7. In bulshada iyo dhallinyarada si joogto ah loogu wacyigeliyo fursadaha shaqo ee jira, tusaale ahaan shaqooyinka farsamada gacanta.

**W/Q: Siciid Abshir Yuusuf**



**Xigashada Sawirka:** AP



**Xigashada Sawirka:** Puntland State House




**Xigashada Sawirka:** Baraha Bulshada

**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA MARAG